



## Home Links Xirriirinta Guriga Cutubka 3: Dabeysaha iyo Biyaha Toddobaadka 1

Qoysaska Qaaliga ah: Inta lagu jiro cutubkan ilmahaagu wuxuu baran doonaa dabeysaha iyo biyaha. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlahaan waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: \_\_\_\_\_

### Luqadda

(La xiriira *Gilberto and the Wind*)

#### **Iska dhig inaad tahay...**

Isku day inaad noqoto dabeysaha. Marka aad afuufto, ka codso ilmahaaga inuu u dhaqaaqo sida *caleen, geed, dhagax, badda, biibiile, dallad, caws dheer, aabutey.*

#### **Bilaabayaasha Wadahadalka:**

- Sidee ayaad u dhaqaaqeysaa?
- Sidee ayuu dhaqdhaqaaqaagu uu isbeddelaa iyadoo ku xiran hadba sida ay dabeysuhu u xoog badantay?

### Hadal iyo Akhris Wadajir Ah (20 daqiiqadood)

#### **Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:**

- Waa maxay qeybta sheekada ka mid ah oo aad ugu jeceshahay?
- Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada?
- Maxaad u maleyneysaa in uu yahay waxa soo xiga oo dhici doona?

### Daahfur

(La xiriira *Gilberto and the Wind*)

#### **Maxay Hawadu Dhaqaajin Kartaa?:**

Soo ururi noocyada kala duwan ee walxaha (sida kubadaha suufka ah, daasad, furarka dhalada, sanduuq, barkin, warqad). Hawo ku afuuf shey kasta adigoo isticmaalaya timo qallajiye, maraxawad, ama awoodooda dabeysaha. Ereyada aad isticmaali karto inta lagu jiro wadahadalkaaga waxaa kamid ah: hawo, neecow, dabeyl, xoog leh, culus, fudud, xoog badan, daciif, neef, xawaare.

#### **Bilaawayaasha Wadahadalka:**

- Miyaad u maleyneysaa in hawadu ay dhaqaajin doonto sheygan? Waa maxay sababta ay u dhaqaajin doonto ama aanay u dhaqaajin doonin?
- Maxaad aragtay?
- Maxay yihiin qaar kamid ah waxyaabaha ay dabayshu ku qaaday *Gilberto and the Wind*?

### Xisaabta

#### **Cayaaraha Lambarka Boodida:**

1. Tus ilmahaaga lambarka u dhexeeya 0 ilaa 7 adigoo isticmaalaya farahaaga oo weydii isaga/iyada inuu ku boodo taas marar badan.
2. Qor lambar u dhexeeya 0 iyo 7 oo u tus ilmahaaga. Ka codso isaga/iyada in ay u boodaan taas marar badan.
3. Sawiro 0 ilaa 7 goobo oo ka codso ilmahaaga inuu u boodo taas marar badan.

#### **Bilaawayaasha wada---hadalka:**

- Immisa ayaad aragtaa?
- Sidee baad ku garanaysaa?

# Buug-gelinta Akhrinta

Hubi maalin walba in adiga iyo ilmahaaga aad wada akhrisaan sheeko. Buugagta waxay noqon karaan kuwa ah af Ingiriisi ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan dabaysha iyo biyaha!

Isniin \_\_\_\_\_ Talaado \_\_\_\_\_ Arbaco \_\_\_\_\_ Khamiis \_\_\_\_\_ Jimco \_\_\_\_\_ Sabti \_\_\_\_\_ Axad \_\_\_\_\_

## Buugaga aan ku akhrino dugsiqa:

*Gilberto and the Wind* qorey Marie Hall Ets  
*One Dark Night* qorey Hazel Hutchins  
*Bringing the Rain to Kapiti Plain* qorey Verna Aaderma

## Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aad jeclaataan:

*The Wind Blew* qorey Pat Hutchins  
*A Rainbow of My Own* qorey Don Freeman  
*The Cloud* qorey Eric Carle

## Tallooyinka si wadajir ah u akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "**Gust** waa dabeyl degdeg ah."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Maxaad u malaynaysaa in dabeyshu aanay iskaashi ula sameyn Gilberto?"